



# Fasaxa mushaarka leh iyo barnaamijyo kale

Jaantuskani wuxuu bixiyaa isbarbardhig guud oo ku saabsan noocyada caanka ah ee fasaxa shaqada ee laga heli karo Minnesota. Waxaa loogu talagalay inuu ka caawiyo shaqaalaha, qoysaska, iyo loo-shaqeeyayaasha inay fahmaan oo isbarbardhigaan barnaamijyada gobolka iyo kuwa federaalka.

Barnaamij kasta wuxuu leeyahay xeerarkiisa, qeexitaannadiisa, iyo habraaca codsigiisa. La hadal loo-shaqeeyahaaga oo la xiriir hay'adda maamusha barnaamij kasta haddii aad qabto su'aalo ku saabsan xaaladdaada.

Jaantuskan wuxuu isbarbar dhigaa afar barnaamij: Fasaxa Mushaarka leh ee Minnesota, Fasaxa Uurka iyo Waalidnimada (PPL), Xeerka Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka (FMLA), iyo Waqtiga Xanuunka iyo Badbaadada la kasbado (ESST).

Barnaamijka	Waxaa maamusha
<p><b><u>Minnesota Paid Leave</u></b> (Fasaxa mushaarka leh ee Minnesota)</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Internetka: <a href="http://paidleave.mn.gov">paidleave.mn.gov</a></li> <li>● Iimaylkaagu: <a href="mailto:PaidLeave@state.mn.us">PaidLeave@state.mn.us</a></li> <li>● Telefoonka: 651-554-7777</li> </ul>	<p>Minnesota Department of Employment and Economic Development (DEED)</p> <p>(Waxda Shaqaaleysiinta iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Minnesota)</p>
<p><b><u>Pregnancy and Parental Leave (PPL)</u></b> (Fasaxa Uurka iyo Waalidnimada)</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Internetka: <a href="http://dli.mn.gov/parental-leave">dli.mn.gov/parental-leave</a></li> <li>● Iimaylkaagu: <a href="mailto:dli.laborstandards@state.mn.us">dli.laborstandards@state.mn.us</a></li> <li>● Telefoonka: 651-284-5075</li> </ul>	<p>Minnesota Department of Labor and Industry (DLI)</p> <p>(Waxda Shaqada iyo Warshadaha ee Minnesota)</p>
<p><b><u>Family and Medical Leave Act (FMLA)</u></b> (Xeerka Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka)</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Internetka: <a href="http://dol.gov/agencies/whd/fmla">dol.gov/agencies/whd/fmla</a></li> <li>● Telefoonka: 612-370-3341</li> </ul>	<p>U.S. Department of Labor (DOL)</p> <p>(Waxda Shaqada ee Maraykanka)</p>
<p><b><u>Earned Sick and Safe Time (ESST)</u></b> (Waqtiga Xanuunka iyo Badbaadada la kasbado)</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Internetka: <a href="http://sickleave.mn.gov">sickleave.mn.gov</a></li> <li>● Iimaylkaagu: <a href="mailto:esst.dli@state.mn.us">esst.dli@state.mn.us</a></li> <li>● Telefoonka: 651-284-5075</li> </ul>	<p>Minnesota Department of Labor and Industry (DLI)</p> <p>(Waxda Shaqada iyo Warshadaha ee Minnesota)</p>



**Wax badan ka baro**  
[paidleave.mn.gov](http://paidleave.mn.gov)

Sharciga:	Fasaxa mushaarka leh ee Minnesota	Fasaxa Uurka iyo Waalidnimada (PPL)	Sharciga Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka (FMLA)	Waqtiga xanuunada iyo Badbaadada ee La Kasbaday (ESST)
Gobol mise federaal?	Gobol	Gobol	Federaal	Gobol
Taariikhda bilowga	Jan. 1, 2026	May 10, 2014	Aug. 5, 1993	Jan. 1, 2024
Astaamo	<ul style="list-style-type: none"> <li>● La bixiyo</li> <li>● Ilaalinta shaqada</li> <li>● Sii-socoshada caymiska</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Aan la bixin</li> <li>● Ilaalinta shaqada</li> <li>● Sii-socoshada caymiska</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Aan la bixin</li> <li>● Ilaalinta shaqada</li> <li>● Sii-socoshada caymiska caafimaadka</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● La bixiyo</li> <li>● Ilaalinta shaqada</li> <li>● Sii-socoshada caymiska</li> </ul>
Muxuu sharcigu qabtaa?	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Wuxuu bixiyaa magdhow mushahar oo qayb ah</li> <li>● Waxaad xaq u leedahay inaad shaqadaada dib ugu laabato fasaxa ka dib, laga bilaabo 90 maalmood kadib marka lagu shaqaaleysiyo</li> <li>● Waxuu daboolaa xaalado socda 7+ maalmood</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Wuxuu bixiyaa fasax aan la bixin</li> <li>● Waxaad xaq u leedahay inaad shaqadaada dib u hesho maalinta aad fasaxa ka soo noqoto, xitaa hadii aad shaqada ku cusub tahay.</li> <li>● Dhalashada ama korsashada ilmo awgeed</li> <li>● Wuxuu daboolaa daryeelka uurka ka hor iyo baahiyaha caafimaad ee la xiriira uurka</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Wuxuu bixiyaa fasax aan lacag la bixin oo shaqada lagu ilaalinayo</li> <li>● Wuxuu daboolaa sababo qoys iyo caafimaad oo la cayimay</li> <li>● Wuxuu daboolaa fasaxa daryeelaha militariga iyo fasaxa baahida degdegga ah ee u qalma</li> <li>● Wuxuu u baahan tahay 12 bilood oo shaqo iyo 1,250 saacadood oo la shaqeeyay</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Wuxuu ilaa 80 saacadood oo fasax la bixiyo sannadkii, baahiyaha caafimaad iyo badbaado awgood</li> <li>● Fasax shaqada la ilaalinayo</li> </ul>
Maxaa fasax loo qaadan karaa?	<ul style="list-style-type: none"> <li>● <b>Fasaxa Caafimaadka:</b> Xaalad caafimaad oo halis ah oo adiga kugu saabsan awgeed</li> <li>● <b>Fasaxa Qoyska:</b> Daryeelka xubin qoys ama baahidaada badbaado awgeed <ul style="list-style-type: none"> <li>● <b>Fasaxa Daryeelka:</b> Daryeelka xubin qoys oo leh xaalad caafimaad oo halis ah</li> <li>● <b>Fasaxa Xiriir-dhisidda:</b> La xiriir-dhisidda ilmo (dhalasho, korsasho, ama daryeel ku-meelgaar ah)</li> <li>● <b>Fasaxa Qoyska ee Militariga:</b> Taageeridda xubin qoys oo loogu yeeray adeeg firfircoon</li> <li>● <b>Fasaxa Badbaadada:</b> Si aad u raadsato caawimaad haddii adiga ama qoyskaaga la indiinku hanjabo rabshada guriga, dhibaatayn galmo, ama hadii lagugu daba-jiro.</li> </ul> </li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● <b>Fasaxa Uurka:</b> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Daryeelka uurka ka hor</li> <li>● Awood-darro la xiriirta uurka</li> <li>● Dhalmada iyo soo kabashada dhalmada ka dib</li> </ul> </li> <li>● <b>Fasaxa Waalidnimada:</b> <ul style="list-style-type: none"> <li>● La xiriir-dhisidda ilmo cusub oo la xiriira dhalasho ama korsasho</li> </ul> </li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● <b>Fasaxa Caafimaadka:</b> Xaalad caafimaad oo halis ah oo adiga kugu saabsan awgeed</li> <li>● <b>Fasaxa Qoyska:</b> Daryeelka xubin qoys</li> <li>● <b>Fasaxa Daryeelka:</b> Daryeelka xubin qoys oo leh xaalad caafimaad oo halis ah</li> <li>● <b>Fasaxa Xiriir-dhisidda:</b> La xiriir-dhisidda ilmo (dhalasho, korsasho, ama daryeel ku-meelgaar ah)</li> <li>● <b>Fasaxa Qoyska ee Militariga:</b> Taageeridda xubin qoys oo loogu yeeray adeeg firfircoon</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● <b>Caafimaad ama Daryeel:</b> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Xanuunkaaga, dhaawacaaga, ama ballamahaaga awgood</li> <li>● Xanuunka, dhaawaca, ama daryeelka caafimaad ee xubin qoys awgeed</li> </ul> </li> <li>● <b>Badbaado:</b> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Ka jawaabidda arrimaha badbaado ee la xiriira rabshad guri, faraxumayn galmo, ama daba-gal adiga ama xubin qoys</li> <li>● Waxay daboolaa maqnaanshaha la xiriira xiritaanka goobta shaqada iyo goobaha daryeelka</li> </ul> </li> <li>● <b>Fasaxa Murugada:</b> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Oo ay ku jiraan xafladaha xusuusta ama wax ka qabashada arrimo sharci iyo maaliyadeed</li> </ul> </li> </ul>

Sharciga:	Fasaxa mushaarka leh ee Minnesota	Fasaxa Uurka iyo Waalidnimada (PPL)	Sharciga Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka (FMLA)	Waqtiga xanuunada iyo Badbaadada ee La Kasbaday (ESST)
Yaa fasax loogu qaadan karaa si loo daryeelo?	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Shaqaale</li> <li>● Lammaane ama xaaska/ninka</li> <li>● Ilmo (dhalay, la korsaday, ama daryeel ku-meelgaar ah)</li> <li>● Waalid</li> <li>● Walaal</li> <li>● Ilmo-yaal</li> <li>● Awoowe/Ayeeyo</li> <li>● Ehelka xaaskaaga/ odeygaaga (waalid, walaalo, carruur)</li> <li>● Qof kasta oo xiriir la leh shaqaalaha oo abuuraya filasho daryeel oo aan magdhow lahayn</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Shaqaale</li> <li>● Ilmaha shaqaalaha oo ka yar 18 jir</li> <li>● Ilmaha shaqaalaha oo ka yar 20 jir, isla markaana weli dhigta dugsiga sare</li> </ul> <p>Waxay khusaysaa oo keliya daryeelka la xiriira uur, dhalasho, ama korsasho</p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Shaqaale</li> <li>● Xaaska/Ninka</li> <li>● Ilmo</li> <li>● Waalid</li> </ul> <p>Ma daboosho walaalo, awoowe/ ayeeyo, ama ehelka xaaskaaga/ odeygaaga</p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Shaqaale</li> <li>● Xaaska/Ninka</li> <li>● Ilmo</li> <li>● Walaal</li> <li>● Waalid</li> <li>● Ilmo-yaal</li> <li>● Awoowe/Ayeeyo</li> <li>● Gabadh-adeer/eedo (niece), wiil-adeer/eedo (nephew), ama ilmo kale oo uu dhalay walaalka shaqaalaha</li> <li>● Eedo, adeer, ama walaal kale ee waalidka shaqaalaha ah</li> <li>● Qof kale oo dhiig ahaan ula qaraabo ah, ama xiriir dhow oo uu la leeyahay shaqaalaha oo la mid ah xiriir qoys.</li> </ul>
Goorma ayaa fasax la qaadan karaa?	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Laga bilaabo Jan. 1, 2026, dhacdo kasta oo u qalanta awgeed</li> <li>● Fasaxa Xiriir-dhisidda waxaa la qaadan karaa wakhti kasta 12 bilood gudahood ka dib dhalasho, korsasho, ama gelin daryeel ku-meelgaar ah</li> <li>● Haddii ilmaha isbitaalka lagu hayo muddo ka dheer tan waalidka dhalay, fasaxa waxaa la qaadan karaa 12 bilood gudahood laga bilaabo taariikhda ilmaha guriga la keenay.</li> <li>● Fasaxa waxaa loo qaadan karaa si joogto ah hal mar oo isku xigta, ama si kala go'an oo marar badan ah</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Wakhtiga uu shaqaaluhu codsado</li> <li>● Fasaxu waa inuu bilaabmaa 12 bilood gudahood ka dib dhalashada ama korsashada, ama 12 bilood gudahood ka dib marka ilmuhu isbitaalka ka baxo</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● 12 bilood gudahood ka dib dhalasho ama meelayn</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Sida saacadaha loo kasbado (ugu yaraan 1 saac 30 saacadood kasta oo la shaqeeyo)</li> <li>● Ilaa 48 saacadood sannadkii (ama ilaa 80 saacadood haddii dhammaantood hal mar la siiyo bilowga sannadka)</li> </ul>
Intee muddo ogeysiis ah ayaa loo baahan yahay in la siiyo?	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Waa inaad shaqada u sheegtaa 30 maalmood ka hor haddii aad horey sii ogtahay inaad fasax u bahaan tahay.</li> <li>● Sida ugu dhakhsaha badan marka aan la sii saadaalin karin</li> <li>● Ogeysiisku wuxuu noqon karaa qoraal, afka ah (si fool-ka-fool ah ama telefoon), fariin qoraal (text), ama elektaroonig</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Shaqaaluhu ayaa doorta goorta fasaxu bilaabmayo</li> <li>● Shaqo-bixiyuhu wuxuu dalban karaa ogeysiis macquul ah</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Ugu yaraan 30 maalmood ogeysiis haddii la sii saadaalin karo</li> <li>● Ogeysiis intii macquul ah marka aan la sii saadaalin karin</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Shaqo-bixiyeyaashu waxay dalban karaan ogeysiis ugu yaraan 7 maalmood haddii dhacdadu la sii saadaalin karo <ul style="list-style-type: none"> <li>● Siyaasadda ogeysiiska ee shaqo-bixiyaha waa inay noqotaa mid qoran</li> </ul> </li> <li>● Sida ugu dhakhsaha badan marka aan la sii saadaalin karin</li> </ul>

Sharciga:	Fasaxa mushaarka leh ee Minnesota	Fasaxa Uurka iyo Waalidnimada (PPL)	Sharciga Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka (FMLA)	Waqtiga xanuunada iyo Badbaadada ee La Kasbaday (ESST)
Shaqo-bixiyeyaasha kee ayaa la daboolaa?	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ku dhowaad dhammaan shaqo-bixiyeyaasha Minnesota</li> <li>Ma jiro shuruud cabbir ganacsi</li> <li>Quruumaha qabiil (Tribal nations) laguma qasbo inay ka qaybqaataan, balse way is-diiwaangelin karaan</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ku dhowaad dhammaan shaqo-bixiyeyaasha Minnesota</li> <li>Ma jiro shuruud cabbir ganacsi</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Shaqo-bixiyeyaasha leh 50 ama ka badan shaqaale, gudahood 75 mayl</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ku dhowaad dhammaan shaqo-bixiyeyaasha Minnesota</li> <li>Ma jiro shuruud cabbir ganacsi</li> </ul>
Shaqaaale-hee ayaa la daboolaa?	<ul style="list-style-type: none"> <li>Inta badan shaqaalaha Minnesota ee: <ul style="list-style-type: none"> <li>Ugu horreyn shaqadoodu ku salaysan tahay Minnesota (oo ay ku jiraan qaar ka shaqeeya dhowr gobol)</li> <li>Kasbaday ugu yaraan 5.3% mushaharka sannadlaha celceliska ee gobolka (qiyaastii \$3,900; qadarku sannad kasta wuu isbedelaa)</li> </ul> </li> <li>Dhamaan shaqaalaha saacadaha yar shaqeeya, kuwa xiliyeedka ah, kuwa kumeel-gaarka ah, iyo kuwa shaqooyinka badan haya intaba waa la siinayaa fasaxaa.</li> <li>Iskiis u shaqeysta way isdiiwaangelin karaan</li> <li>Shaqaalaha dawladda federaalka, shaqaalaha boostada, iyo shaqaalaha tareennada lama daboolo mana isdiiwaangelin karaan</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Inta badan shaqaalaha Minnesota way u qalmaan</li> <li>Lama rabo ugu yaraan saacado ama muddada shaqo</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>U shaqeeyay shaqo-bixiyaha ugu yaraan 12 bilood</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Qof kasta oo Minnesota ka shaqeeya 80 saacadood ama ka badan sannadkii</li> <li>Shaqaalaha/ka shaqeeyayaasha soo socda barnaamijku ma daboosho: <ul style="list-style-type: none"> <li>Qandaraaslayaal madax-bannaan</li> <li>Mutadawiciin iyo shaqaalaha gurmada ee diyaar-joogga ah (on-call) ee la bixiyo</li> <li>Mas'uuliyiin la doortay ama la magacaabay</li> <li>Shaqaalaha beeraha qoyska ee shaqeeya 28 maalmood ama ka yar sannadkii</li> </ul> </li> </ul>
Immisa fasax ayaa qofku sanad gudahiis qaadan karaa?	<ul style="list-style-type: none"> <li>Sannadka faa'iidada (benefit year) gudaheeda, qofku wuxuu u qalmaa ugu badnaan: <ul style="list-style-type: none"> <li>12 toddobaad oo Fasaxa Caafimaadka ah</li> <li>12 toddobaad oo Fasaxa Qoyska ah</li> <li>20 toddobaad oo isku-dar ah Fasaxa Caafimaadka iyo Fasaxa Qoyska</li> </ul> </li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ilaa 12 toddobaad</li> <li>12-ka toddobaad lama dhimi karo muddo kasta oo fasax la bixiyo ama aan la bixin oo loo qaaday ballamaha caafimaad ee daryeelka uurka ka hor.</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>12 toddobaad hal sano gudaheed</li> <li>26 toddobaad fasaxa daryeelaha militariga</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Inta waqti ah ee shaqaaluhu kasbado, hase yeeshee shaqo-bixiyuhu wuxuu xaddidi karaa kasbashada ilaa 48 saacadood sannadkii, wuxuuna xaddidi karaa wadarta la heli karo ilaa 80 saacadood wakhti kasta.</li> </ul>
Maxaa ku dhaca caymiska caafimaadka inta fasax la ku jiro?	<ul style="list-style-type: none"> <li>Shaqo-bixiyayaashu waa inay sii hayaan caymiska</li> <li>Shaqaaluhu waa inay sii wadaan bixinta qaybtooda khidmadaha (premiums)</li> <li>Caymisku waa inuu ahaadaa sidii hore</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Shaqo-bixiyayaashu waa inay sii hayaan caymiska</li> <li>Shaqaaluhu waa inay sii wadaan bixinta qaybtooda khidmadaha (premiums)</li> <li>Caymisku waa inuu ahaadaa sidii hore</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Shaqo-bixiyayaashu waa inay sii hayaan caymiska</li> <li>Shaqaaluhu waa inay sii wadaan bixinta qaybtooda khidmadaha (premiums)</li> <li>Caymisku waa inuu ahaadaa sidii hore</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Shaqo-bixiyayaashu waa inay sii hayaan caymiska</li> <li>Shaqaaluhu waa inay sii wadaan bixinta qaybtooda khidmadaha (premiums)</li> <li>Caymisku waa inuu ahaadaa sidii hore</li> </ul>

Sharciga:	Fasaxa mushaarka leh ee Minnesota	Fasaxa Uurka iyo Waalidnimada (PPL)	Sharciga Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka (FMLA)	Waqtiga xanuunada iyo Badbaadada ee La Kasbaday (ESST)
Sidee ayuu noocan fasaxu ula falgalaa noocyada kale ee fasaxa?	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Shaqo-bixiyeyaashu waxay socodsiiin karaan isla waqtigaas FMLA haddii qofku labadaba u qalmo isla dhacdada u qalanta</li> <li>● Shaqo-bixiyeyaashu waxay socodsiiin karaan isla waqtigaas PPL haddii qofku labadaba isla waqtigaas u qalmo</li> <li>● Shaqo-bixiyeyaashu kugu qasbi kari waayaan inaad isticmaasho fasax la bixiyo (paid time off) ka hor ama inta aad ku jirto Paid Leave</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Shaqo-bixiyeyaashu waxay socodsiiin karaan isla waqtigaas FMLA</li> <li>● Shaqo-bixiyeyaashu waxay socodsiiin karaan isla waqtigaas Paid Leave</li> <li>● Wadarta fasaxa isla dhacdada awgeed kama badnaan karto 12 toddobaad</li> <li>● Haddii shaqaale isla waqtigaas isticmaalo ESST, PTO, ama fasax kale oo la bixiyo (fasax/maalmo xanuun), wadarta fasaxa kama badnaan karto 12 toddobaad</li> <li>● Shaqaale wuxuu qaadan karaa FMLA dheeraad ah ka badan 12-ka toddobaad haddii uu leeyahay xaalad caafimaad oo halis ah oo ka duwan (oo aan uur la xiriirin)</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Waqtiga fasaxa hal mar oo keliya ayaa la tirinayaa marka in ka badan hal sharci khuseeyo</li> <li>● Shaqo-bixiyeyaashu waxay isla waqtigaas socodsiiin karaan FMLA iyo Paid Leave isla dhacdada awgeed</li> <li>● Shaqo-bixiyuhu wuxuu dalban karaa in shaqaaluhu isticmaalaan fasax la bixiyo (paid time off)</li> <li>● ESST waxay bixin kartaa mushahar inta FMLA la qaadanayo</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● ESST waxaa loo isticmaali karaa baahiyo muddada-gaaban ah oo aan u qalmin Paid Leave</li> <li>● Shaqaaluhu waxay dooran karaan inay isticmaalaan ESST beddelkii Paid Leave</li> </ul>
Maxay yihiin ilaalinta shaqada ee shaqaaluhu helaan?	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Xuquuqda inaad ku soo laabato shaqadaadii ama boos u dhigma waxay bilaabataa 90 maalmood laga bilaabo taariikhda lagu shaqaaleysiiyay</li> <li>● Lama aargoosan karo (retaliation) haddii aad codsato, qaadato fasax, ama weydiiso xuquuqdaada</li> <li>● Faa'iidooyinka waa la soo celiyaa marka aad soo laabato (mudnaan, mushahar, xaalad)</li> <li>● Sii-socoshada caymiska inta fasaxa lagu jiro iyo ka dib</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Xuquuqda in shaqada dib lagu celiyo waxay bilaabataa marka shaqadu bilaabato</li> <li>● Inaad ku noqoto shaqo la mid ah ama u dhigma</li> <li>● Lama aargoosan karo (retaliation) haddii aad codsato, qaadato fasax, ama weydiiso xuquuqdaada</li> <li>● Waa inaad heshaa wax kasta oo isbeddel mushahar (pay-scale) ah oo dhaca inta fasaxa lagu jiro</li> <li>● Sii-socoshada caymiska inta fasaxa lagu jiro iyo ka dib</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Inaad ku noqoto shaqo la mid ah ama u dhigma</li> <li>● Sii aad u hesho ilaalintan, waa inaad shaqaynaysay ugu yaraan hal sano (12 bilood) iyo wadarta 1,250 saacadood.</li> <li>● Lama aargoosan karo (retaliation) haddii aad codsato, qaadato fasax, ama weydiiso xuquuqdaada</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Sharcigu wuxuu mamnuucayaa aargoosi (retaliation).</li> <li>● Haddii shaqaale shaqada laga eryo ama shaqada laga joojiyo isagoo si sharci ah u adeegsanaya xaqiisa ESST, DLI waxay amri kartaa tallaabooyin magdhaw ah oo ay ku jirto in shaqada dib loogu celiyo.</li> <li>● Sii-socoshada caymiska inta fasaxa lagu jiro iyo ka dib</li> </ul>
Xaggee ayaa wax badan laga baran karaa?	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Minn. Stat. §§ 268B.01, et seq. <a href="http://paidleave.mn.gov">paidleave.mn.gov</a></li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Minn. Stat. § 181.941 <a href="http://dli.mn.gov/parental-leave">dli.mn.gov/parental-leave</a></li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● 29 U.S.C. §§ 2601, et seq. <a href="http://dol.gov/whd/fmla">dol.gov/whd/fmla</a></li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>● Minn. Stat. § 181.9445-.9448 <a href="http://sickleave.mn.gov">sickleave.mn.gov</a></li> </ul>

Jadwalkani ma aha il sharci ama talo sharci ama maaliyadeed, mana tixgelinayo ku-dhaqanka ama saameynta sharci ama xeer kale. Fadlan sidoo kale ogow in sharciga Minnesota Paid Leave, iyo sharciyo badan oo kale oo shaqo, ay ka mid tahay xuquuq gaar ah oo dacwad (private right of action) (taas oo ah, waxay shaqaalaha siinaysaa xaqa ay dacwad sharci ku qaadi karaan iyaga oo keliya ama iyada oo qareen loo marayo). Sidaa darteed, macluumaadka ku jira jadwalkani ma aha mid qasab ah, mana aha in si kale loogu fasirto inuu yahay isha kaliya ee awoodda leh ee su'aalahan. Shakhsiyadka iyo ururrada waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay talo ka raadsadaan qareen oo ku saabsan arrimaha lagu xusay dukumentigan.



**Wax badan ka baro**  
[paidleave.mn.gov](http://paidleave.mn.gov)

Minnesota Department of Employment and Economic Development  
180 E 5th St Suite 1200 | Saint Paul, MN 55101